



Kooxda IDG ee DMCC

120 Emarat Atrium Building, Sheikh Zayed Rd, PO Box 50784, Dubai, UAE

HIMILADA IYO DABEECADDA


Luulyo 2018

NOOCA 1





KOONTAROOLKA NOOCA

NOOCA	LA SOO SAARAY	MUALIF	WAXAA IN LA SHAACIYO AMRAY
1	Agoosto 18	I D GORDON	



HIMILADA IYO DABEECADDA

1. Baaxada.

Dukumiintigaan wuxuu qeexayaa aragtida iyo waxa ay tahay IDG, waxay ay doonayso inay qabato iyo sida ay dooneyso inay u qabato hawlaha. Ujeeddadu waxay tahay in la sharaxo waxa ay ka dhigan tahay ka mid 'noqoshada IDG' iyo sida aanu u aragno in aan u raacno habkayaga aanu hawlaha u fulinayno, sidaas awgeedna wixii aan ka filayno dadka ku dhex jira IDG, iyo sida aan ula macaamilno kuwa nagu hareeraysan/nagu xiran, iyo kuwa aan la macaamilno.

Waxay khusaysaa qof kasta oo ku jira IDG iyo dhammaan hay'adaha hoosaadkeeda.

2. Mabaadiida Aasaaska

DG waxaa loo aasaasay inay bixiso shaqooyin macno, abaal marin iyo xushmad u leh shaqaalihii hore ee Gurkha. Marka sidaas la sameynayo, IDG waxay ka ballaarisay oo ka korortay mabda'a aasaasiga ah si loo shaqaaleeyo dhammaan noocyada ragga iyo dumarka, kuwa caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ahba, si loo gaaro himilooyinkayaga. Iyada oo ay taasi jirto, waxaa jira hal mabda'a oo aasaas aasaasi ah oo noqon doona mid laga run sheego.

Waxaan dooneynaa inaan siino shaqooyin wanaagsan dadka wanaagsan.

3. Hiigsi

Hiigsiga IDG waa laba qaybood.

Marka hore, Kooxda IDG waxay dooneysaa inay noqoto adeeg bixiyaha maareynta halista oo sumcad ku leh inay tahay tan ugu fiican heerarka anshaxa iyo heerarka dhaqanka la isla yaqaan. Gaar ahaan, waxaan jeclaan lahayn inaan noqonno, oo nalagu aqoonsado, shirkad leh ballanqaad qoto dheer oo anshax ku dhisan taasoo lagula dhaqmayo dhammaan dadka noo shaqeeya iyo kuwa aan la shaqeeyno.

Marka labaad, IDG waxay dooneysaa inay noqoto hogaamiyaha suuqa adeegyada maareynta halista, iyadoo siineysa macaamiisha Dowladda, Ganacsiyada iyo NGO-yada adeegyadooda iyada oo lala tartamayo adeeg bixiyeyaasha kale ee gobollada iyo kuwa adag ee adduunka. Waxaan jeclaan lahayn inaan noqonno hal-hayska loogu talagalay dhawaaqa, isku-hallaynta iyo kalsoonida wada-hawlgalayaasha iyo bixiyeyaasha adeegyada; iyadoo la siinayo nabad maskaxeed macaamiisheena iyo dammaanad qaad in ay ku jiraan gacmo wanaagsan, oo daacad ah.





4. Anshaxa

Kooxda IDG waxay sameysay siyaasado badan kuwaas oo uga turjumaya anshaxeena siyaabo kala duwan. Dhammaan siyaasadaha iyo habraacyada banaanka ayaa ka tarjumaya anshaxayaga, laakiin kuwa muhiimad gaarka ah lihi waa:

- Ammaanka IDG – Siyaasadda xeerka anshaxa
- Ammaanka IDG – Siyaasadda la dagaallanka musuqmaausqa
- Ammaanka IDG – Siyaasadda Shaqaaleysiinta.

Waxaan rumaysanahay, oo aan ku dedaalnaa inaan u dhaqano qaab ka turjumaya mabaadiida aasaasiga ah ee anshaxayaga.

- Dulqaad uma lihin laaluushka iyo musuqmaasuqa.
- Ballan-qaad qoto dheer oo ku aaddan shaqaalaheenna iyo wanaajintooda oo dhan walba ah
- U hoggaansamidda Sharciga
- Si wanaagsan ula macaalimiladda macmiilkayga iyo kuwa aanu macmiilka u nahay.
- Dadaal joogto ah si aan uga sii fiicnaano sida aan hadda nahay.

5. Tani maxay macno ii leedahay aniga?

Himiliada iyo anshaxa IDG waxay u baahan tahay dhammaan shaqaaluhu inay fahmaan oo ay raacaan mabaadiidan aasaasiga ah ee muhiimka ah,. Waxay u baahan doonaan fasiraad macquul ah oo la fahmi karo, caqli gal ah, naxariis iyo xigmad leh, oo ku salaysan qaabkaaga shakhsiyeed, laakiin falanqaynta ugu dambaysa ee IDG waxay ku saabsan tahay wanaajinta iyo sameynta waxa saxda ah. IDG, heerarka kasta waxay ku siin doontaa taageero iyo caawimaad aad ku horumarto oo lagu dabaqay anshaxa adiga iyo kooxahaaga.